Foomka Diidmada Ka-qaybgalka Ardayga ee Qiimaynta Guud ee Maxalliga ah Sanad Dugsiyeedka 2026-2027

South Washington County Schools waxay adeegsadaan aalado qiimayn guud oo taxane ah oo kooban, oo jaan go'an ilaa saddex jeer sanadki. Imtixaanadaan, FastBridge iyo Capti ReadBasix, waxay ka caawiyaan macalimiinta inay si degdeg ah u qiimeeyaan kobaca ardayga, aqoonsadaan shakhsiyaadka laga yaabo inay ka faa'iidaystaan taageerada waxbarista ee dheeraadka ah, iyo xaqiijinta in Nidaamkeenna Taageerada Heerarka Badan (MTSS) uu si wax ku ool ah ugu shaqaynayo carruurta oo dhan.

Inkastoo aan si wayn u boorinayno ka-qaybgal buuxa si ay nooga caawiso qaabaynta wax barashada fasalka, waxaan ixtiraamaynaa xuquuqda qoyska ee ah inay gaaraan go'aamo waxbarasho. Fadlan dib-u-eeg ka reebitaanada sharciga gobolka ee muhiimka ah ee hoose ka hor inta aadan buuxin foomkan.

OGAYSIISKA SHARCIYEED EE XEERKA READ EE MINNESOTA EE MUHIIMKA AH: Iyadoo la raacayo faris adag oo ka socota Waaxda Sharciga ee Waaxda Waxbarashada Minnesota (MDE), dadka masuulka ka ah ardayda MA KA BIXI karaan ama ma diidi karaan qiimaynta aqoonta akhriska iyo qoraalka aasaasiga ah ee waajibka ah ee ardayda dhigata Kindergarten ilaa Fasalka 3aad. Xeerka READ wuxuu sharci ahaan degmooyinka dugsiyada dadweynaha kaga baahan yahay inay qiimeeyaan arday kasta oo dhigta K-3 saddex jeer sanad dugsiyeedki iyadoo la adeegsanayo agab uu ansixiyay gobolku. Wixi xog dheeraad ah, fadlan ka eeg webseedka Hagista Qiimaynta Xeerka Read ee Waaxda MDE ee fasallada 4-12. Diidmada ka-qaybgalka wuxuu khuseeyaa oo KALIYA qiimaynta xisaabta maxalliga ah iyo habdhaqanka, ama qiimaynta aqoonta akhriska iyo qoraalka ee ardayda Fasalada 4 ilaa 12 kuwaasoo aan muujinaynin hanashada heerka fasalka ee aasaasiga ah.

XOGTA ARDAYGA & DUGSIGA

Magaca Koowaad ee Ardayga: _____

Magaca Dambe ee Ardayga: _____

Taariikhda Dhalashada: _____/_____/_____ Heerka Fasalka ee Hadda: _____

Dhismaha Dugsiga: _____

Aqoonsiga Ardayga (haddii la garanayo): _____

LA-TASHI & GARWAAQSI WAALID/MASUUL

Saxiixidda xagga hoose, waxaan xaqiijinayaa in aan go'aankan kala tashaday macalinka(macalimiinta) ardaygayga ama maamulka dhismaha. Waxaan fahamsanahay in ka reebista canugayga ee cabbiradaan qiimaynta maxalliga ah:

- Ardaygayga uusan heli doonin dhibco kobac ama aqoon shakhsiyeed xagga imtixaanada la xushay.
- Go'aamada waxbarasho ama meelaynta laga yaabo inay saamayso maqnaanshaha xogtan.
- Barnaamij waxbarasho kale lama bixinayo inta uu imtixaanku socdo; ardaygayga wuxuu samayn doonaa akhris madax-bannaan ama barasho buuq la'aan ah inta asaagiisa la qiimaynayo.
- Taageerooyinka heerarka kala duwan ee fasalka caadiga ah (MTSS) iyo la socodka horumarka weli la siin doono ardaygayga iyadoo lagu salaynayo xogta maalinlaha ah ee laga hayo waxqabadkiisa fasalka.

XULASHADA QIIMAYNTA (Fadlan sax saar dhammaan kuwa khuseeya)

Waxaan codsanayaa in ardaygayga laga reebo cabbiradaan gaarka ah ee qiimaynta guud ee maxalliga ah ee soo socda:

• Qiimaynta Akhriska iyo Qoraalka ee FastBridge Fasallada 4-8	• Qiimaynta Xisaabta ee FastBridge Fasallada K-8
• Qiimaynta Akhriska iyo Qoraalka ee Capti ReadBasix Fasallada 4-9	Qiimaynta Tacliinta iyo Habdhaqanka Bulshada ee FastBridge mySAEBRS (lagu qaado dugsiyo la xushay oo kaliya)
Sababta Diidmada:	

Magaca Masuulka (Fadlan Far Waawayn Ku Qor):
_____

Saxiixa Masuulka: _____

Taariikhda: _____/_____/_____

Tilmaamaha Gudbinta: Fadlan saxiix oo koobiga warqadda ama dhijitaalka foomkan si toos ah ugu celi dugsiga canugaaga ka hor xilliga imtixaan qaadista. Foomkani wuxuu si adag ansax ugu yahay sanad dugsiyeedka hadda oo kaliya.